# Qorshaha Dadka Aqoontooda Luuqada Ingiriiska ay Xaddidan (Limited English Proficiency [LEP])

*La cusbooneysiiyay Siteembar* 2024

*Xusuusin: cusbooneysiinta Siteembar 2024 kuma jiraan xogta tirakoobka ee la cusbooneysiiyay.* Macluumaadka qorshahan wali wuxuu ka tarjumayaa xogta tirakoobka 2010.

Qorshahan Dadka Aqoontooda Luuqada Ingiriisku Xaddidan tahay ayaa loo diyaariyay in uu wax ka qabto mas 'uuliyadda Metro Bus oo ah helitaanka kaalmada maaliyadeed ee federaalka maadaama ay la xiriiraan baahiyaha ay qabaan shakhsiyaadka ay xirfadoodu luqadda Ingiriisigu xadidan tahay. Qorshaha waxaa loo diyaariyay iyadoo la raacayo Cinwaanka VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee 1964, 42 USC 2000d, et seq, iyo xeerarkiisa hirgelinta, taas oo sheegaysa in qofna aan loo dulqaadan doonin takoor ku saleysan jinsiga, midabka ama asalka qaranka.

Amarka Fulinta (Executive Order) 13166, oo cinwaankeedu yahay Helitaanka Adeegyada Dadka Aqoontooda Luuqada Ingiriisku Xaddidan tahay (Access to Services for Persons with Limited English Proficiency), wuxuu tilmaamayaa in ula dhaqmida qofka is ka duwan dadka kale taas oo ku saleysan awood la 'aanta qofka ee ah inuu ku hadlo, akhriyo, qoro ama fahmo af Ingiriiska waa nooc ka mid ah takoorka asalka qaranka. Arintani waxay ku hagaysaa hay 'ad kasta oo federaal ah in ay soo saarto hagitaan loogu talagalay dadka ay u ageegaan iyaga oo caddeynaya waajibaadkooda ah inay hubiyaan in takoorka noocaas ah uusan dhicin. Amarkan wuxuu khuseeyaa dhammaan hay 'adaha gobolka iyo kuwa maxalliga ah ee hela lacagaha federaalka, oo ay ku jiraan Guddiga Gaadiidka Rakaabka Magaalada St. Cloud iyo Nawaaxigeeda (St. Cloud Metropolitan Transit Commission) oo hela kaalmo federaal ah iyada oo loo marayo Waaxda Gaadiidka Mareykanka [US DOT].

Dadka LEP ga ah waxaa ka mid ah shakhsiyaadka luuqadooda koowaad aysan Ingiriis ahayn oo awood kooban u leh akhriska, qorista, hadalka ama fahamka Ingiriiska kuna sheegeen Tirakoobka Mareykanka in aysan si fiican ugu hadlin Ingiriiska ama aysan ku hadlin Ingiriiska gabi ahaanba. Isku-xire (link) ah Qorshaha LEP ee Metro Bus ayaa lag sameeyay boga internetka ee Metro Bus.

Metro Bus waxay soo saartay Qorshahan Aqoonta Ingiriiska ee Xaddidan (LEP) si ay gacan uga geysato aqoonsiga tallaabooyinka macquulka ah ee lagu siinayo caawimaad luqadeed dadka leh aqoonta Ingiriiska ee xadidan (LEP) kuwaas oo doonaya inay helaan adeegyada gaadiidka dadweynaha ee ay bixiso hay 'adda gaadiidka.

Qorshahan wuxuu adeegsaday falanqaynta LEP-ga Mareykanka si loo aqoonsado shakhsiyaadka laga yaabo inay u baahan yihiin caawimaad luqadeed; siyaabaha caawimaad la siin karo; tababarka shaqaalaha; iyo sida loo ogeysiiyo dadka LEP in caawimaad la heli karo. Falanqeyntu waxay tixgelisaa waxyaabaha soo socda:

1. <u>Tirada ama saamiga dadka LEP ee aagga adeegga ee laga yaabo in loo adeego ama ay u badan tahay inay la kulmaan barnaamijka Metro Bus, waxqabadka ama adeegga.</u>

   Warbixinta Tirakoobka 2010 waxay aqoonsatay in 103,000 oo qof ay ku nool yihiin St. Cloud, Sauk Rapids, Waite Park iyo Sartell. Bulshooyinkani waxay ka kooban yihiin afarta aag ee adeegga magaalada ee Metro Bus. Intii u dhaxeysay 2000 iyo 2010, dadka Aasiyaanka, Madowga, iyo Hispanic/Latino ga ah waxay kor u kaceen heerka 50.9%, 59.8% iyo 74.5% siday u kala horreeyaan, marka la barbardhigo dadka caddaanka ah ee kor u kacay kaliya 2.8%.

   Macluumaadka Tirakoobka 2010 wuxuu tilmaamayaa 7.1% dadka ku nool St. Cloud, 2.5% dadka ku nool Sartell, 3.6% dadka ku nool Sauk Rapids iyo 7.6% dadka deggan Waite Park ay uga hadlaan hadlaan luuqado aan Ingiriisi ahayn guryahooda. Af-Soomaaligu wuxuu ahaa luqadda koowaad ee lagu hadlo, marka laga reebo Ingiriiska. Waxaa lagu qiyaasaa Degaanka Waxbarashada St. Cloud in 90% ardayda qaangaarka ah ee aan <u>ugu hadlin Ingiriiska sida fiican</u> ama <u>aan ku hadlin Ingiriis gebi ahaanba</u> waa qaxooti Soomaali ah. Waxaa lagu qiyaasaa in 10% kale ay yihiin dadka ku hadla Isbaanishka. Waxaa jira wadar ahaan 38 luuqadood oo looga hadlo aagga St. Cloud iyo Nawaaxigeeda (Metropolitan Area), taas oo ay sabab u tahay arday aad u tiro badan oo caalamka ka kala yimid oo dhigta Jaamacadda St. Cloud State University.

   Iyadoo la tixgelinayo isbeddelada dadka ee aagga ilaa iyo tirakoobkii 2000, sahaminta ururada kale ee u adeega isla dadka iyo shaqaalaha khadka hore ee Metro Bus ayaa la sameeyay.

   - Degaanka Waxbarashada St. Cloud #742 qeybta Waxbarashada Dadka Waaweyn iyo Waxbarashada Dadka Waaweyn ee Sauk Rapids/Rice waxay u adeegaan dadka qaxootiga ah ee ku nool aagga adeegga, dadka qaxootiga ah ee muddada dheer joogay iyo kuwa dhowaan soo galayba labadooda. Laga soo bilaabo bartamihii Siteembar, 2024 Waxbarashada Aasaasiga ah ee Dadka Waaweyn ee St. Cloud wuxuu lahaa qiyaastii 750 arday diiwaangashan. Qiyaastii 150 ka mid ah ardaydani waxay ku qoran yihiin fasalada barashada Ingiriiska bilowga ah ee Luuqadda Labaad, taas oo macnaheedu yahay inaysan si fiican ugu hadlin Ingiriiska ama aysan ku hadlin Ingiriiska gabi ahaanba.
   - Xarunta Shaqaalaha MN (MN Workforce Center) Daraasad la sameeyay ayaa lagu sheegay in ay u adeegaan dad Soomaali ah oo sii kordhaya iyo tiro yar oo soo galooti ah oo ka yimid dalal kale. Xarunta Shaqaalaha waxay ku qiyaaseysaa dad gaaraya 6000 oo qof oo Soomaali ah oo ku nool aagga St. Cloud Metropolitan Area. Waa waayo-aragnimadooda in shakhsiyaadka Soomaalida ah ay si xoogan u sii wadaan barashada luuqadda Ingiriiska. Waxaa jira dad yar oo Hispanic ah oo aan xiiseynin barashada luuqadda. Dadka Hispanic ga ah waxay u isticmaalaan Xarunta Shaqaalaha si yar marka loo eego dadka Soomaalida ah. Xarunta Shaqaalaha ( Workforce Center) waxay la kulantay in shaqsiyaadka ka yimid dalal aan ahayn Soomaaliya iyo Mexico ay caadi ahaan ku hadlaan waxoogaa Ingiriis ah.
   - Ururada kale ee u adeega dadka qaxootig ah/soo galootiga ah ee mar dhow yimid (oo ay ku jiraan St. Cloud Area Somali Salvation Organization [SASSO]; Hands Across the World, Hay 'adaha Samafalka Katooliga, Lutheran Social Services, Community Anti-Racism Education [CARE] task force; iyo ururka cusub ee dhawaan la aasaasay ee United South

Sudan) waxay tilmaamayaan koritaan joogtada ah oo ku yimid dadka soo qaxootiga ah ee ku nool St. Cloud iyo Nawaaxigeeda

- Isku Xirayaasha Wadada Cayiman (Fixed Route Dispatch ) iyo Darawalada ayaa ka warbixiyay koror sanadle ah oo ku yimid bus raacitaanka dadka Soomaalida ah. Waxay cadeeyeen in inta badan rakaabka Soomaaliyeed ay yihiin haween qaan-gaar ah, badankoodna ay la safrayaan qof wehel ah oo waxoogaa af Ingiriis fiican ku hadla. Waxay sidoo kale soo sheegeen in inta badan rakaabka ku hadla Isbaanishka ay awoodaan inay fahmaan ereyada Ingiriiska fudud ah oo ay kula hadlaan dadka iyaga oo adeegsanayo ereyo weedho ah kali ah ama isticmaalaya gacan ka hadal.

2. Inta jeer ee dadka LEP ay la xiriiraan barnaamijyada Metro Bus, waxqabadyada ama adeegyada.

   Shakhsiyaadka LEP ga ah waxay raacaan adeegga Wadada Cayiman (Fixed Route) ee Metro Bus maalin kasta marka ay u safraan dugsiga, ballamaha, Adeega wax iibsiga iyo howlaha bulshada. Maaddaama shaqsiyaad badan oo ah LEP ay si joogto ah u helaan tababar safar oo ku qoran afkooda hooyo ee Af-Soomaaliga ama Isbaanishka oo ka yimid Metro Bus Travel Guides waxaa la filayaa in dadka ku hadla af-soomaaliga iyo Isbaanishka ay si joogto ah u kordhi doonaan. Tirada yar, laakiin sida joogtada ah u sii kordhasa ee dadka LEP ga ah ee degaankaan, oo ay weheliso barnaamijka tababarka gaadiidka dadweynaha ee tayada leh, waxay si joogto ah u kordhin doontaa xiriirka u dhexeeya shakhsiyaadka ay aqoontooda luuqada Ingiriisku kooban tahay iyo hawlwadeennada Metro Bus iyo shaqaalaha darawalada shaqda u diria.

3. Dabeecadda iyo muhiimada barnaamijyada, waxqabadyada ama adeegyada ay bixiso Metro Bus ee dadka LEP.

   Waxaa sii kordhaya ururinta juqraafi ahaaneed ee shakhsiyaadka LEP-ga Soomaaliyeed ee aagga adeegga Metro Bus. Dadka intooda badan, 93% ee Nawaaxiga St. Cloud (St. Cloud Metropolitan Area), waxay ku hadlaan Ingiriis oo keliya. Waxaa jira adeegyo bulsho, ururro xirfad iyo hoggaamineed oo ku dhex jira aagga adeegga Metro Bus oo diiradda saaraya gaaritaanka/la xiriiridda shaqsiyaadka LEP ga ah. Metro Bus waxay si dhow ula shaqeysaa ururadan.

   Metro Bus waxay sameysaa laba nooc oo adeeg oo gaadiid ah: 1) Wadada Cayiman iyo 2) Dial-a-Ride oo u adeegta kuwa naafonimadoodu ka hor istaageyso inay fuulaan nidaamka Wadada Cayiman. Metro Bus waxay leedahay barnaamijka Gaarida Jaaliyada (Community Outreach) iyo Tababarka Safarka kaas oo bixiya tababar shaqsiyeed iyo mid kooxeed oo loogu talagalay nidaamka Wadada Cayiman.

   - Tababarka safarka ee luuqadda Ingiriiska ku baxa oo loogu talagalay dadka codsanaya tababarka wadada ee nidaamkeena Wadada Cayiman.
   - Tababarka safarka gaarka ah ee luuqadaha Isbaanishka iyo Af-Soomaaliga ee loogu talagalay shakhsiyaadka aan ugu hadlin Ingiriiska si fiican. Metro Bus waxay aqoonsatay in shakhsiyaadka ku hadla Isbaanishka iyo Af-Soomaaliga ay si dhakhso ah u bartaan Nidaamka Wadada Cayiman marka lagu barayo luuqadooda hooyo.

4. <u>Ilaha laga heli karo Metro Bus iyo qiimaha guud ee lagu bixiyo caawinta LEP.</u>

Metro Bus waxay qiimeysay ilaha la heli karo si ay u siiso caawimaad dadka LEP ga ah. Adeegyada tarjumaadda waxaa lagu heli karaa qiimo macquul ah iyada oo loo marayo ururada maxalliga ah. Mutadawiciinta bulshada ayaa la heli karaa kharash la 'aan si ay uga caawiyaan turjumaadda hadalka ah iyo tan dukumiintiyada iyada oo ku saleysan sida loogu baahan yahay. Metro Bus waxay leedahay hal (1) Tababaraha Safarka oo Af-Soomaali ku hadla iyo hal (1) Isbaanishka ku hadla ee Khabiirka Gaarida Jaaliyada iyo Bus Raacidda (Community Outreach and Mobility Specialist) ah. Mid kasta oo ka mid ah shaqaalahan ayaa la heli karaa inta lagu jiro saacadaha shaqada caadiga ah si ay si gaar ah ugu shaqeeyaan sida Tilmaamaha Socdaalka ay u tababaraan shaqsiyaadka ku hadla Isbaanishka iyo Af-Soomaaliga si ay u raacaan adeegga Wadada Cayiman.

Boga internetka ee Metro Bus wuxuu u tarjumi karaa dhammaan macluumaadka gaadiidka 53 luuqadood oo kala duwan iyada oo loo marayo tarjumaadda Google. Metro Bus sidoo kale wuxuu tarjumayaa xayeysiin dhowr ah, tababar iyo agab macluumaad oo ku qoran Isbaanish iyo Soomaali. Waxyaalahaas waxaa lagu bixiyaa daabacaad, boga internetka iyo iyada oo loo marayo koodhka QR ee marin u helka moobiilka.

Iyada oo ku saleysan falanqaynta afar-factor, Metro Bus waxay soo saartay Qorshaheeda LEP sida lagu sharaxay qaybta soo socota.

Tallaabooyinka soo socda waxaa qaaday Metro Bus si loo aqoonsado loona caawiyo shaqsiyaadka LEP inay adeegsadaan adeegyadooda gaadiidka dadweynaha:

- **Qaybinta Macluumaadka**
  Jadwalka basaska, macluumaadka boga internetka iyo xayeysiin waxaa lagu qaybiyaa iskuullada ESL, xarumaha xanaanada, hay 'adaha caafimaadka iyo adeegga aadanaha, bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, waxaana lagu dhejiyay basaska la raaco. Waxyaalahaan waxaa ku jira macluumaadka la xiriiridda Gaarida Jaaliyada ee Metro Bus Shaqaalahooda iyo shaqaalaha mar kasta la heli karo ee Isbaanishka iyo Af-Soomaaliga ku hadla.

- **Tababarayaasha Safarka**
  Shaqaale labada luuqadood ee Ingiriiska iyo Af-Soomaaliga ama Isbaanishka ku hadla ayaa ka shaqeeya Metro Bus iyagoo ah Tababarayaasha Safarka. Tababarayaasha safarka waxaa loo qoondeeyay qayb ka mid ah barnaamijka bulshada si ay u siiyaan caawimaad shakhsiyaadka LEP si ay u isticmaalaan adeegyada gaadiidka dadweynaha ee Metro Bus.

- **Miisaska Ilaha Xogta**
  Miisaska ilaha xogta waxaa loo qorsheeyay oo lag sameeyaa bulshada oo dhan ee ururada, hay 'adaha iyo dhacdooyinka gaarka ah ee bartilmaameedsanaya macaamiisha LEP ga ah si ay u siiyaan macluumaad ku saabsan adeegyada Metro Bus si shakhsi ahaaneed iyo si koox ahaaneed.

- **Boga Internetka ee Hay'ada**
  Boga internetka ee wakaaladda waxaa ka shaqeeya Metro Bus waxaana ku jira macluumaad muhiim ah oo ay ka mid yihiin jadwalka, khariidadaha wadada, iyo Sida loo Raaco Baska fiidiyoowyo laga duubay bas raacidda ee wadada Metro Bus. Fiidiyowyadan waxaa lagu soo gudbiyaa af Ingiriis, Soomaali iyo Isbaanish waxayna bixiyaan soo bandhigid muuqaal ah oo ku saabsan sida loo raaco baska, bixinta khidmadda, jiidida xcariga bus joojinta iyo ka bixitaanka baska. Shakhsiyaadka LEP ah waxay la daawadaan fiidiyowga qofka Tababaraha Safarka ah taas oo qayb ka ah habka tababarka safarka.

- **Fursadaha Tababarka**
  - Tababarka Fasalka dhexdiisa ah iyo kan Raacitaanka (Onboard) - Metro Bus waxay bixisaa furasado  tababar fasal ah ama mid bus raacitaanka ah oo loogu tala galay dadweynaha guud oo ay ku jiraan shaqsiyaadka ku hadla Ingiriiska iyo kuwa aan Ingiriiska ku hadlin.
  - Tababarka Safarka - Tababarka safarka waxaa si bilaash ah loo siiyaa shaqsiyaadka u baahan caawimaad barashada sida loo raaco baska wadada go 'an, loo akhriyo jadwalka oo loo maro nidaamka. Tababarka safarada rakaabka waxaa la siiyaa shaqsiyaadka ku hadla Ingiriiska iyo kuwa aan Ingiriiska ku hadlin. Adeegyada turjumaadda ayaa sidoo kale la bixiyaa. Tababarka safarka waxaa lagu bixiyaa iyadoo la adeegsanayo hagaha tababarka Waxaad Raaci Kartaa (You Can Ride). Shaqaalaha Metro Bus waxay la safri doonaan shaqsiga laga bilaabo bus raacitaanka ilaa meesha loo socdo waxayna tusin  doonaan sida loo raaco adeegga gaadiidka dadweynaha ee Metro Bus.

- **Qalabka Isgaarsiinta**
  - Kaararka Tilmaanta (Flashcards) Aqoonsiga Luqadda ee Xafiiska Tirakoobka  – kaararkaan tilmaamaya luuqada waxaa laga isticmaalaa Xarunta Kala Wareega. Shakhsiyaadka iskood isugu aqoonsaday sida dadka aan aqoon u lahayn Ingiriiska waxaa laga yaabaa in aysan heli karin caawimaad turjumaad oo deg deg ah isla markiiba. Hase yeeshaa, nidaamkani wuxuu ka caawiyaa shaqaalaha Metro Bus inay aqoonsadaan baahida ka caawinta luuqadda.
  - Kaararka Goobta la Tegayo – rakaabka waxaa la siiyaa kaararka meesha loo socdo si ay ugu isticmaalaan raacitaankooda mustaqbalka haddii ay dhibaato ku qabaan aqoonsiga meesha ay u safrayaan.
  - Buugaagta Sawirka leh – Buugaagta Sawirka leh ee Baska ee Metro Bus ayaa la heli karaa waxaana la siiyaa shakhsiyaadka aan awoodin inay ku hadlaan Ingiriiska oo uusan la socn wehel la raacaya si ay uga caawiyaan tarjumaadda. Buugga sawirka leh wuxuu ka kooban yahay sawirrada xarumaha Metro Bus iyo basaska iyo meelaha ugu caansan ee ku yaal aagga adeegga Metro Bus. Buuggan waxaa adeegsada shaqsiga si uu ula hadlo/xiriiro mid ka mid ah shaqaalaha howl dirista ama shaqaalaha howsha wada. Dhammaan hawlwadeennada Metro Bus iyo shaqaalaha shaqo dirista waxay heli karaan buugga sawirada si loo isticmaalo marka loo baahdo.
  - Khariidadaha Wadada – Khariidadda Nidaamka Baska ee Metro waa luuqad caalami ah. Metro Bus waxay iibisaa khariidadaha waxayna ku jiraa khariidadda boga internetka ee www.ridemetrobus.com.

- **Waxyaabaha la Turjumay**

- Tarjumaada Google (Google Translate) ayaa laga heli karaa boga internetka si loogu turjumo jadwalka luqadaha aan Ingiriiska ahayn.
- Dhammaan jadwalka basaska waxaa ka mid ah farriinta soo socota ee lagu turjumay Isbaanish iyo Soomaali:

  *Ma u baahan tahay caawimaad barashada sida loo raaco baska? Ka Wac Metro Bus: 320-528-6895.*

- Xeerka Anshaxa Metro Bus (Metro Bus Code of Conduct) waxaa lagu dhejiyaa basaska iyada oo af Ingiriis ah dhammaan basaska Wadada Cayiman iyo Dial-a-Ride waxaana la socda sawirrada si ay u muujiyaan dhaqanka la rajeynayo. Boorka waxaa ku qoran luqadda Isbaanishka iyo Af-Soomaaliga oo tilmaamaya in macluumaadka loo turjumi doono marka la codsado. Buug yaraha Xeerka Anshaxa oo af Soomaali iyo aaf Isbaanish ah ayaa sidoo kale laga heli karaa basaska oo dhan.
- Boga internetka/websaaytka Metro Bus wuxuu u tarjumi karaa dhammaan macluumaadka gaadiidka 53 luuqadood oo kala duwan iyada oo loo marayo tarjumaadda Google.
- Metro Bus sidoo kale wuxuu tarjumayaa dhowr qoraal oo ku saabassan, tababar iyo macluumaadyo kale oo ku qoran Isbaanish iyo Soomaali. Qoraaladaas waxaa lagu heli karaa iyaga oo daabacan, iyo boga internetka iyo iyada oo la isticmaalayo QR koodka lagu beegayo kaamarada telefoonka gacanta.

- **Adeegyada Turjumaadda**
  - Metro Bus waxay adeegsataa adeegyada tarjumaadda iyada oo la isticmaalayo shirkada luuqadda ee Bridge-World Language Center. Adeegyada turjumaadda waxaa lagu bixiyaa luqadaha oo dhan haddii loo baahdo.
  - Marka la heli karo, xubnaha qoyska iyo bixiyeyaasha kale ee adeegga ayaa sidoo kale loogu yeeri karaa inay fasiraan.